



LET'S DO THIS – Somali

Dadka jira 16 sanno iyo ka weyn waxaa lagula talinayaa tallaalka xoojiyaha ah ee COVID-19 sida ugu dhakhsaha badan

Maxaa loogu baahan yahay xoojiyaha?

Xitaa haddii uu haddaba kugu dhacay COVID-19, daraasadu waxay muujineysaa in difaacaaga jirku uu bilaabay inoo hoos u dhaco ilaa wakhti.

Yaa qaadan kara tallaalka xoojiyaha ah?

Dadka jira 16 sanno iyo ka weyn waxay qaadan karaan tallaalka xoojiyaha 3 bilood ka dib qiyaasta tallaalkooda labaad ee COVID-19.

Xitaa dadka dhalinyarada ah ee caafimaadka qaba waa inay qaataan tallaalka xoojiyaha ah. Inta lagu jiro xilliga qaboobaha, khatarta ay ku qaadi karaan fayrasku way kordheysaa, saa daraadeed tallaalka xoojiyaha ah waa tallaabo sahlan oo aad qaadi kartid si aad nafsadaada iyo kuwa kuu dhow aad amaankooda u ilaalin lahayd.

Ma u baahan tahay xoojiye haddii uu dhowaan kugu dhacay COVID-19?

Haa. Qof kasta difaaciisa jirka ee dabiiciga ah ee ka hortaga caabuqu waa kala duwan yahay. Xoojiyayaashu waxay xoojin karaan inay kaa ilaaliyaan jirro daran boqolkiiba 95.

Waxaad qaadan kartaa tallaalka xoojiyaha ah isla markaad si buuxda uga soo bogsooto fayraska. Dadka badidiisa tani waxay qaadataa qiyaastii 4 ilaa 6 toddobaad caabuqa kadib.

Tallaaladee ayaa loo qaadan karaa qiyaasta xoojiyaha tallaalka?

Tallaalada Moderna mRNA iyo Pfizer waxaa lagu talinayaa inay tahay qiyaasta xoojiyaha ee loogu talagalay dadka jira 18 sanno iyo ka weyn, xitaa haddii aad qaadatay tallaal kale labadaadii qiyaasood ee tallaal. Tallaalka Pfizer waa tallaalka xoojiyaha ah ee loo ogolaaday dadka jira 16 -17 sanno jirka.

Tallaalka AstraZeneca waa la isticmaali karaa marka tallaalka mRNA aan caafimaad ahaan loo tilmaamin, ama qofku uu diido in lagu tallaalo tallaalka mRNA. Tallaal Novavax waa la isticmaali karaa haddii uusan jirin tallaal kale oo COVID-19 oo loo tixgeliyo inuu qofkaas ku haboon yahay.

Miyaan kala kulmayaa waxyeello xoojiyaha?

Waxaa laga yaabaa inaad isku aragto waxyeellooyinka guud ee fudud markaad qaadaneyso qiyaasta xoojiyaha, oo la mid ah kuwii markii aad qaadatay labada qiyaas tallaal ee koowaad ka dib. Waxaa ku jiri kara gacan xannuun, xumad, muruqyada oo ku xannuuna ama aad dareento daal. Kala hadal GP-ga haddii aad saluugto.

Waa maxay sababta dadka jira wax ka yar 16 sanno aysan u qalmin inay qaataan xoojiyaha?

Qiyaasaha tallaalka xoojiyuhu wakhtigan xaadirka lagulama tallinayo dadka ka yar 16 sanno. Da'a kooxeedkan, wax guud ma aha inay ku dhacdo jirro daran oo COVID-19, labada qiyaas tallaal ee ugu horeysa ayaa bixiya jawaab difaac oo xoog badan.

Ma amaan baa inaad qaadatid tallaalka xoojiyaha markaad uurka leedahay?

Qiyaasta tallaalku waa amaan waxaana lagula tallinayaa dumarka uurka leh ee qaatay 2 qiyaas tallaal ah tallaalka COVID-19.

Inaad istallaasho, sidoo kale waxaad ilaalineysaa ilmahaaga. Waxaa jirta caddeyn ah in ilaalinta aad ka heshaa tallaalka sidoo kale waxay u gudubtaa ilmahaaga.

Caddeyn aad u badan ayaa muujineysa in tallaalada COVID-19 ay yihiin kuwo kuu amaan ah haddii aad uur leedahay, naas nuujinta ama isku deyida inaad uur qaado. Ma saameynayaan uur qaadistaada.

Waxa tallaalku ka samaysan yahay ma igu haboon yihiin aniga?

Dhammaan waxyaalaha laga sameeyey tallaalada COVID-19 waxay ku qoran yihiin **Australian Register of Therapeutic Goods (Diiwaanka Badeecada Daawada Australiya).**

Tallaalada COVID-19 ee lagu ogolaaday Australia midkoodna:

- > ma laha walxaha xayawaanka ama ukun
- > ma laha wax fayras nool ah oo keena COVID-19
- > uma saameyn karaan ama dhexgeli karaan DNA gaaga sinaba
- > ma laha wax ku soconaya
- > aan u habooneyn dadka ka soo jeeda diimaha qaarkood ama waxay rumeysan yihiin.

Haddii aad sooman tahay bisha Ramadan, waa amaan inaad qaadatid xoojiyaha iyo tallaalka COVID-19. Tallaalada COVID-19 ma jebin doonaan tallaalkaaga maadaama aysan keenayn in wax calooshaada galaan.

Tallaalada COVID-19 ma bedelayaan DNA gaaga ama ma bedelayaan jinsigaaga. Tallaaladu waxay barayaan jirkaaga sidii uu isaga laftiisu isaga difaaci lahaa COVID-19 waxaana la sameeyaa maalmo guddahood. Ma saameeyaan ama uma dhexgalaan DNA gaaga sinaba.

Ma kashabbaa tallaalada xoojiyuhu?

Maya, si kastaba ha ahaatee haddii aad u qalanto oo aadan qaadan qiyaasta xoojiyaha wax ka badan 6 bilood ilaa iyo qiyaastadii labaad ee tallaalka luuguma arki doono sidii qof tallaaladiisa COVID-19 ay yihiin kuwii ugu danbeeyey waxayna noqonayaan kuwo wakhtigoodii dhaafay.

Waa maxay tallaalka xoojiyaha COVID-19 ee xilliga qaboobaha ah iyo yaa qaadanaya mid?

Dadka qaarkii aad ayey khatar badan ugu jiraan COVID-19. Si loo ilaaliyo dadkaan ka hor xilliga qaboobaha, waxaana lagu tallinayaa qiyaasta xoojiyaha (labaad) ee dheeraadka ah.

Laga bilaabo 22 Abriil, waxaad u qalantaa tallaalka xilliga qaboobaha (xooliyaha labaad) haddii aad:

- > jirto 65 sanno ama ka weyn
- > Aabuurijinaal iyo Torres Strait Islander jira 50 sanno iyo ka weyn
- > deganaha tasiilaadka daryeelya naafada ama daryeel dadka da'da ah
- > ee jira 16 sanno iyo ka weyn oo aad si daran difaaca jirkaagu u hooseeyo. Dadka kooxdaan ku jira, qiyaasta tallaalka xilliga qaboobaha waxay noqoneysaa qiyaasta tallaalka COVID-19 shan meeloodkiiba (saddex qiyaasood oo tallaalka, xoojiyaha koowaad iyo xoojiyaha xilliga qaboobaha).

Waxaad heli kartaa tallaalka xoojiyaha COVID-19 xilliga qaboobiyaha 4 bilood ka dib qiyaasta xoojiyahaaga koowaad, ama 4 bilood ka dib caabuqa COVID-19 la xaqiijiyey haddii uu kugu dhacay COVID-19 ilaa iyo qiyaastii xoojintaada koowaad.

Dadka badidooda u qalma tallaalka COVID-19 ee xilliga qaboobiyaha dheeraadka ah ayaa sidoo kale ay u qalmaan tallaalka hargabka oo bilaash ah.

Ma amaan baa inaad qaadato COVID-19 iyo tallaalka hargabka isla markiiba?

Waa amaan haboon inaad qaadatid labadaba tallaalka COVID-19 iyo tallaalka hargabka isku mar. Booqo GP-gaaga, farmasiga haddii aad jeclaan lahayd inaad heshid labada tallaalka isku mar.

Ballan raadso

Ballamaha xoojiyuhu waxaa laga helayaa kummaan goobood oo NSW oo dhan, oo ay ku jiraan farmasiyada iyo GP-yada.

Rugaha caafimaadka NSW Health badidooda sidoo kale waxay aqbalaan 'ballan la'aanta' oo micnaheedu yahay uma baahnid inaad ballan sameysato.

- > Ballan raadso ama ballan la'aan tag [rugta caafimaadka tallaalka NSW Health](#).
- > Ka raadso ballan [rugta caafimaadka, GP ama farmasiga kuu dhow](#).

Haddii aad caawimaad uga baahan tahay ballan inaad sameysato, wac National Coronavirus Helpline (Khadka taleefanka Coronavirus ee Qaranka) **1800 020 080** oo riix 8 wixii ah adeegyada turjubaanka.